

al-Caqiidah ad-Daxawiyah

Waxaa Qqoray:

Al-Imam Al-Daxawi, Abu Jacfar al-Warraaq

Waxaa Turjumay: Sh. Dr. Hersi aw Mohamed

ARARTA TURJUMAANKA

Waxaan dhammaan aqristayaasha ogaysiinayaa in aan intii tabartayda ah isku deyay in aan macnihii dhabta ahaa u soo gudbiyo aqristema Soomaaliyeed, hase ahaatee ay labada af (somaliga iyo carabigu) waxyaabo ku kala duwanyihiin, sidaa darteed, haddii aan ka baqo in macnaha erayga carabiga ahi xambaarsanyahay aanuu erayga soomaaliga ahi qaadi karin, waxaan ku deray eray ama erayo kale oo aan ku kabay aanna gelshay laba bilood dhexdood sida (...).

Waxaa kale oo aan aqristaha xusuusinayaa, in kitaabkani yahay “naskii” asliga ahaa oo aanay la socon sharaxyadii badanaa ee kitaabkan loo yeelay.

Bandar Seri Begawan

Taariikh: 15.6.1998

: - -
:
.

Bismillaahi ar-Raxmaani ar-Raxiim:

Caalimkii Xujada Islaamka ahaa, Abu Jacfar al-Warraaq Ad-Daxaawi, ee reer Masar, Allaha u naxariistee wuxuu yiri:

Tani waa caddayntii caqiidada ahlu sunnada iyo jamaacada, ayada oo la tixraacayo mad-habta fuqahada diinta Islaamka, Abii Xaniifa, an-Nucmaan bin Thaabit al-Kuufi iyo Abii Yuusuf, Yacquub bin Ibraahiim al-Ansaari iyo Abii Cabdillaahi, Maxamad bin Al-Xasan Ash-shaybani, dhammaantood Allaha ka raalli noqdee, Iyo waxa ay rumaysanyihiin ee caqiido ah oo ay Eebbe ugu dhawaanayaan.

:

Waxaan tawxiidka Ilaahey ka leenahay, annaga oo rumaysan towfiiqdiisa:

.

.

.

Eebbe waa kali shirko aan lahayn. Wax ekaankiisa ahna majiraan. Wax ka adagna malaha. Ilaahey ka leenahay, annaga oo rumaysan towfiiqdiisa:

doonaa dhammaad la'aan. Dhiman maayo baabi'ina maayo. Wax uusan doonaynna ahaan mayaan.

Maladu gaari mayso. Maankuna haleeli maayo. Dadkana ekaankiis ma aha. Wuu noolyahay dhimanna maayo. Wuu u taaganyahay hurdina maayo. Wuxuu abuuraa baahi la'aan. Wuxuuna quudshaa dhibaato la'aan. Wuxuu dilaa cabsi la'aan. Wuxuuna soo baxshaa daal la'aan.

Astaamihiisa ayuu soojireen ku ahaa uunkiisa ka hor. Abuurkoodana wax astaan ah oo uusan intuusan abuurin lahayn ugama kordhin. Sidi uu asigu astaamihiisa horay ugu jiray, ayuu sidoo kale, astaamihiisa waligiis ku jiri doonaa. Uunka markuu uumay ka dib uma kordhin magaca “uume”. Noolaha uu curiyayna kama kororsan magaca “curiye”¹.

¹Ujeeddadu waa in Eebbe waynaayee uu waligiis ku sifaysnaa astaamahaas oo aanuu ka kororsan abuurista ama uumista uu uunka uumay.

Wuxuu leeyahay mudnaanta Eebbe ayada oo aan eebbe loo-ahaade jirin. Wuxuu leeyahay mudnaanta abuure ayada oo aan la-abuure jirin. Sida uu u ahaa nooleeye, kadib markuu dhintaha nooleeyay, ayuu magacaa mutaystay intuusan noolayn. Sidoo kale ayuu mutaystay magaca abuure inta uusan noolaha abuurin. taasi waa in uu wax walba awoodo, wax walba ay asiga sabool u yihiin. Arrin walbana ay asiga u fududdahay. Wax uu u baahanyahay ma jiraan, "**Wax la mid ahna ma jiraan, waana maqle arka**"[as-shuuraa:11].

Uunka aqoontiisa buu ku uumay. Qaddar ayuuna u yeelay. Waqtii ay go'aanna wuu u gooyay. Wawa ay falayaanna intii uusan uumin buu ogaaday. Wuxuu faray inay caabudaan. Wuxuuna ka reebay in ay ku caasiyaan. Wax walbana waxay ku socdaan qaderkiisa iyo dooniddiisa. Wuxuu doonana way ahaanayaan. Addoomuhuna doonid ma leh wuxuu Eebbe ladoono mooyee. Wuxuu la doonana way ahaadaan, wuxuusan dooninna ma ahaadaan.

Ciddii uu doono wuu hanuunshaa. Wuuna magangelshaa oo dhowraa deeqsinimo. Cidduu doonana wuu lunshaa, wuuna hoojiyaa oo jaribaa caadilnimo. Uunka oo

idilna awooddiisay ku jiraan, caadilnimadiisa iyo deeqsimadiisa bayna u dhexeeyaan. Wuuna ka hufanyahay shirkada iyo isburrinta.



Mid celshaahi ma jiro xukunkiisa, mid dabagalaana ma jiro go'aankiisa. Mid ka adkaadana ma jiro amarkiisa. Intaas oo dhan baanna ku rumaynay, waxaanna hubsannay in waxyabuhu dhammaan xaggiisa ka yimaadeen. Oo Muxamad addoonkiisii la doortay yahay, oo uu nabigiisii la dhaweeyay yahay, oo uu rasuulkiisii laga raalli noqday yahay. Oo uu nabiyasha qatinkoodi yahay. Oo uu imaamkii kuwa alla kacabsiga badan yahay. Oo uu sayidkii rasuullada yahay. Oo uu Eebbe kii uu jeclaaday yahay. Nabinimo la sheegtaa asiga ka dibna waa lunsanaan iyo habow. Waana kii loo soo diray jinni iyo insi dhammaan. Si xaq ah iyo hanuunsanaan. Iyo ilays iyo iftiin.

3

Waxaan rumaysannahay, in Quraanku hadalkii Eebbe yahay, asiga ayuu ka soo kaahay qaabla'an hadal ah. Kuna soo dejiyay rasuulkisa waxyi ahaan. Mu'miniintuna sidaa ayay ku rumeeyeen xaq ahaan. Waxayna hubsadeen in uu yahay hadalkii Ilaahey oo

sugan. Lama abuurin sida hadalka uunka. Qofkiise maqla ee ku andacooda in uu hadalka aadanaha la mid yahay, wuu kufriyay hubaal. Eebbana (qofkii sidaa yeela) wuu liiday oo dhaleeceeyay uguna goodiyay naarta Saqara. Asiga oo leh kor ahaayee: "**Waxaannu gelin doonaa naarta Saqara**" [*al-Mudathir* 26].

4

Kolkii uu Eebbe ugu goodiyay naarta Saqara kuwii yiri: "**Quraankani ma aha waxaan hadal bashar ahayn**" [*al-Mudathir* 25], ayaan ogaannay hubsanayna in uu yahay hadalkii Ilaalii basharka uumay, uusanna u ekayn hadalka aadanaha, qofkii eebbe ku tilmaama astaan astaamaha aadanaha ka mid ahna wuu kufriyay hubaal. Qofkii arrintan fahmana wuu ku cibra qaataa, hadalka kufaarta ekaankiisana wuu ka reebtoomaa. In aanan Eebbe iyo sifooyinkiisu bashar u ekayna wuu ogaadaa.

5



.25 4
.23 22 5

6

Ebbe arkiddiisuna xaq bay u tahay ahlu jannada, koobid la'aan iyo qaab la'aan sida kitaabku u sheegay "**Wajiyal maalintaas way ifi. Eebbahana way eegi**" [*al-Qiyaamah* 22-23]. Tafsiirkiisuna waa wuxuu Eebbe uga danlahaa oo uu ogaaday, dhammaan waxyaabaha arrintaas uga soo arooray xaddiiska saxiixa ahna ee nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, laga soo weriyay, waa sidii uu u yiri, macnihiisuna waa sidii uu uga danlahaa. Dhexgeli mayno arrimahaas annaga oo aragtideenna ku laqbaynayna, ama hawadeenna ku malaynayna, maxaa yeelay nin diintiisu nabadgashay ma jiro haddii uusan Eebbe iyo rasuulkiisa isu dhiibin, una celin aqoonta wixii isaga darsama kii aqoonta u lahaa.

Diinta Islaamkuna sugnaan mayso haddii aan la aqbalin Eebba la isu dhiibin. Qofkiise doona aqoonta ogaalkeeda la iska reebay, fahmadiisuna aanay ku qancin isdhiiibidda, dooniddiisu waxay ka xijaabtaa towxiidka sugar iyo aqoonta calasta ah iyo iiamaanka saxiixa ah, kolkaas buu ku wareeraa kufriga iyo iiamaanka dhexdooda iyo rumaynta iyo beeninta iyo inkiridda iyo sugidda inta u dhaxaysa, asiga oo labalabaynaya oo habawsan oo shakisan, mu'min rumeeyayna aan ahayn, gaal beeniyayna aan ahayn.

In Eebbe la arkayana marumaynin kuwa malaha u qaatay⁶ ama ku ta'wiilay fahmadooda, maxaa yeelay ta'wiilka aragtida Alle, iyo ta'wiilka macna kasta oo Eebbe la cusjiyo, waa ta'wiilka oo laga tago, iyo sugidda⁷ oo lagu ekaado, diinta muslimiintuna taas bay ku joogtaa, qofkii aan “diidmada (*Nafyi*)”⁸ iyo “ekaysiinta (*Tashbiih*)”⁹ iska dhowrinna wuu sibxadaa nasahiddana (*Tanziih*)¹⁰ ma haleelo, Eebbeheenna, waynaayee oo korreeyee wuxuu ku astaysanyahay sumadaha midnimada (*wuxdaaniyah*), kuna tilmamanyahay tilmaamaha kalnimada (*ferdaaniyah*), uunka wax asiga ku macne ah kuma jiraan, soohdin iyo dhamaad iyo tiirar iyo xubno iyo aaladana kor buu ka ahaaday, jihoyink lixda ahi ma koobaan sida la-abuurayaasha oo kale.



Dheelmintuna (*Micraajka*)¹² waa xaq, Nabigana nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, waa la dheelmay hubaal, soojeed ayaana laf ahaantiisa samada la fulshay,

⁶ Eebbe in la arkayo ayadda "**Wajiyaal maalintaas way ifi. Eebbahana way eegi**" [*al-Qiyaamah* 22-23]. Aya caddaynaya, hase ahaatee, mushabihadu waxay dhaheen qaab ahaan ayaa loo arkayaa, muctasiladuna waxay dhaheen laba arki mayo, ahlusunnaduna waxay dhaheen waa la arkayaa qaab la'an. Marka labada qolo ee ah mushabihada iyo muctasilada iimaankooda ku saabsan aragtida Eebbe ma toosna ayuu uga jeedaa sheekhu.

⁷ In la sugo wixii kitaabka iyo sunnada ku soo arooray

⁸ Sida Muctazilada oo diiday jiritaanka sifooinka Eebbe oo yiri sifooinkaasi iyo Ilaahey waa isku hal oo waa Ilaaaha laftiisa.

Waa mad-habta Wahhaabiyada iyo Mushabihada iwm, ee leh Ilaahey sifooinkyisu waa sida khaliqiisa oo kale, waxayna rumaysanyihiin in Ilaahey lug iyo gacan iyo indho iwm run ah leeyahay sida khaliqiisa oo kale.

Waa mad-habta ahlu sunnada, oo ah in Ilaaaha laga nazaho wixii aanan ku munaasab ahayn ee sifoojin ah, ahlu sunno waxaa looga jeedaa muslimiinta raacsan mad-habti Imam Ashcari, ee loogama jeedo wahhaabiyada iyo Ikhwaanka iwm ee ka mid ah kooxaha fallaagada ah ee soo baxay waayahan dambe.

kadibna halkii sare ee uu Eebbe doonay ayuu ahaaday, Eebbe ayaana wixii uu doono ku karaameeyay, wixii uu u waxyoodayna wuu u waxyooday, “**Qalbiguna ma beeniyo, wuxuu arkay** (Nabigu)” [*an-najam:11*].

Haddaba Allaha Nabiga korkiisa naxariis iyo nabadjelyo yeelo korkiisa aakhiro iyo adduunba.

Harada laga cabayo (*xowdka*) taas oo uu Eebbe ku karaameeyay nabigiisa, kaas oo oonbeel u ah ummadiisa, waa xaq, shafaacada uu u kaydshay ummadiisana waa xaq, sida xaddiiska lagu sheegay ballankii uu Eebbe kor ahaayee ka qaaday Aadan iyo carruurtiisana waa xaq Eebbana hubaal horay ayuu u ogAADAY dhammaan markaliya tirada inta jannada geli doonta, iyo tirada inta naarta geli doonta, kolka tiradaas waxna kuma kordhi doonaan, waxna iskama dhimi doonaan.

Falalka dadkuna waa sidoo kale, waxay ahaanayaan intii uu Eebbe ogaatay in ay fali doonaan, qof walibana wixii loo abuuray waa loo fuddudeeyay, falalkuna waa waxay ku dhammaadaan, dadka kii raayana waa mid go'aanka Eebbe iyo guddoonkiisa ku

¹² *Micraajku*: waa dheelinta Nabiga nnk loo dheelmay samada, *Israa-guna*: waa dheelinta dhulka lagu dheelmay ee dhxeeyay Maka iyo Baytu Muqadas.

raayay kii dhurdarsadana, waa kii go'aanka Eebbe iyo guddoonkiisa ku dhurdarsaday go'aanka (qaderka) asalkiisuna waa sirta uu Eebbe kor ahaayee abuurkiisa ka daahay, (sirtaasna – qof kale daaye)malag la dhaweeeyay iyo nabi lasoo diray midna ma ogaanin, in hoos loo galo oo laga fikirna waxay sabab u tahay hoog, jaranjarana waxay u tahay wayto waana derejada qooqa, haddaba diktoonaansho oo dhan ha laga digtoonaado ka fiirsashada iyo ka fikiriddeeda iyo ka labalabaynteeda.

13

Maxaa wacay, Eebbe kor ahaayee qadderka ogaanshahiisa uunkiisa wuu ka qarshay, ka salgaariddiisana wuu ka reebay, sida uu kitaabkiisa ugu yiri:”**Lama warsanayo wuxuu fali iyagase waa la warsan**”[*al-anbiyaa:23*], haddaba qofkii warsada muxuu (Eebbe) sidaa u yeelay, wuxuu is hortaagay xukunka kitaabka, qofkii xukunka kitaabka is hortaagana gaaladuu ka mid ahaaday.

Kolka intaa (aan soo sheegnay) waa guud ahaan inta uu u baahanyahay qofkii qalbigiisa la nuurshay ee awliyada Ilaahey ka mid ah kor ahaayee waana derejada kuwa aqoonta ku xeel dheeraada, maxaa wacay cilmigu waa labo: cilmi uunku garankaro iyo cilmi uunku garan karin, marka in la inkiro cilmiga la garan karo waa

.23

13

gaalnimo, in la sheegto cilmiga aan la garan karinna waa gaalnimo, iimaankuna sugnaan maayo, haddii aan cilmiga la garankaro la oggolaan, oo aan laga tegin doonista cilmiga aan la garankarin.

Looxa iyo qalinkana waannu rumaysannahay, iyo dhammaan wixii lagu dhigay, haddii uunka oo dhan isugu yimaado wax uu Eebbe qoray in ay ahaanayaan si ay uga dhigaan wax aanan ahaanayn, taas ma awoodeen, hadii ay dhammaan isugu yimaadaan wax uusan Eebbe kor ahaayee qorin si ay u ahaysiiyaan ma awoodeen, wixii qalinku ku dhacay way ahaanayaan ilaa maalinta qiyaamaha, wixii addoonka gafana waligood ma haleeleen, wixii haleelayna waligood ma gafeen.

14

15

.2

14

38

15

Addoonkana waxaa ku waajib ah in uu ogaado in cilmiga Eebbe ka horreeyay wax kasta oo uunkiisa ka mid ah, markaas buu go'aan toosan oo aan ka noqosho lahayn u yeelay, go'aankaasi qabyo kuma jirto cid raadraacaysana ma jirto, cid tiraysana ma jirto, cid doorinaysana ma jirto, uunkiisa samooyinka iyo dhulka ku noolna qabyo iyo dheeraad midna ma laha, arrintaasina waxay ka mid tahay iimaanka gunuddiisa iyo asalka aqoonta iyo ictiraafka tawxiidka Alle kor ahaayee iyo Eebbe nimadiisa. Sida uu Eebbe kor ahaayee ugu sheegay kitaabkiisa: "**Waxkasta yuu abuuray oo u ahaysiiyay si qiyaasan**" [*al-furqaan* :2]. Waxaa kale oo Eebbe yiri kor ahaayee "Ammarka Eebbana waa qadder xukuman" [*al-axsaab*:38].

Kolka Hoog wuxuu u sugnaaday qofkii qadderka (go'aanka Alle) Eebbe kula murma, laab bugta ayayna u keenatay ka fikiridda qadderka, maladiisa uu umuuraha Ilaahey ee qarsoon ku raadshayna, waxay u gaysay sir qarsoon, wuxuu ka soo sheegayna wuxuu ku noqday beenlow daambaabay.

Carshiga iyo Kursiguna waa xaq, Eebbana wuu ka dhanyahay carshiga iyo inta ka hoosaysa, wax kastana wuu koobay wuuna ka sarreeyaa. Uunkiisana wuu tiray awood ay xaalkiisa ku ogaadaan.

Waxaanna leenahay: Eebbe (Nabi) Ibraahim ayuu waday ka dhigtay, (Nabi) Muusana Eebbe hadal buu kula hadlay, aaminsanaan iyo rumayn iyo sugid awgeed (ayaanna sidaa u leenahay)..



Malaa-igtana waan rumaysannahay iyo nabiyaalka iyo kutubtii rasuullada lagu soo dejiiyay, waxaanna ka marqaati kacaynaa in ay xaq cad ku taagnaayeen. dadka qibladeenna raacsanna muslimiin mu'miniin ah ayaan ku magacaabaynaa, kol haddii ay aqoonsanyihiin wixii nabigu, nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, la yimiday, wixii uu yiri iyo wixii uu soo sheegay dhammaanna rumaysan oo aanan diiddanayn. Eebbaa ku doodi mayno, diinta ilaahayna been ka sheegi mayno.



Quraankana ku murmi mayno, waxaanna ka marqaati nahay in uu hadalkii Eebbaaha aduunka yahay, uuna Jibriil soo dejiiyay, dabadeedna baray rasuullada sayidkoodi Maxamad, nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, waana hadalkii Ilaahey kor ahaayee, wax la sinmaya oo hadalka uunka ahna ma jiraan, quraanka in la uumay ma rumaysnin, jamaacada muslimiintana khilaafi mayno.

Qof ahlu qiblada ka mid ahna dambi uu galay dartiis ku gaalayn mayno kol haddii uusan xalaalaysan. Dhihina mayno: dambi qofkii ku kaca, iiماانکیسا wax u dhibi maayo.

Waxaan u rejaynaynaa kuwa xasanaadka fala ee mu'miniinta ka mid ah in xumaantooda la dhaafo Eebbaa jannada naxariistiisa ku gelsho, mana hubno in ay reera janno yihiin ugana marqaati kici mayno.

Kooda xumaha falana waan u dambidhaaf waydiinaynaa, waanna u baqaynaa, quusna ka dhigi mayno. hubsashada (in jannada la gelaayo) iyo quusashada (ka quusashada jannada) labaduba diinta islaamka ayay qofka ka bixinayaan. Ahlu qiblada waddadooda xaqqa ahina labadaa ayay u dhaxaysaa. Addoonkana iimaanka kama baxshaan wax aan ahayn inkiridda wixii uu ku soo galay.



Iimaankuna waa: afka oo (shahaadada) laga qirto iyo qalbiga oo laga rumeyyo, dhammaan wixii nabiga si run ah uga soo fulay ee sharci iyo sharax ahaana waa xaq, iimaankuna waa hal, mu'miniintuna asalkiisa way ka simanyihin, mudnaanta ay is dheeryihinna, waa cabsida, dhowsashada, waxa naftu doonayso oo laga leexdo iyo mudnaanta oo had iyo jeer lagu nagaado. Mu'miniinta oo dhamina waa awliyada ilaahay, Eebbe agtiisana waxaa ugu karaamo badan koodii ugu daacad badan oo quraanka raaci og.

Iimaankuna: Waa Eebbe oo la rumeyyo iyo Malaa-igtiisa iyo Kutubtiisa iyo Rasuulladiisa iyo Maalinta Qayaamaha iyo Qadderka khayrkiisa iyo shartiisa, qadderkana macaankiisa iyo qaraarkiisa dhammaan Eebbe kor ahaayee xaggiis buu ka yimid, annaguna intas oo dhan waan rumaysannahay, rasuulladiisana kala sooci mayno, dhammaantoodna wixii ay inoola yimideen waannu rumaysanaynaa.



16

Dadka kabaa-irta (dambiyada waawayn) falayna, ee ummadda Nabi Muxamad ka mid ah, nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, naarta ku raagi maayaan, haddii ay dhintaan ayaga oo tawxiidka Eebbe qirsan, inkasta oo aanay towbad keenin, kaddib markii ay xag Eebbe u keceen ayaga oo rumaysan, Eebbe xugunkiisa iyo wixii uu doono bayna arrintoodu ahaanaysaa, haddii uu doono fadligiisa yuu ugu dambi dhaafayaa oo iska daynayaa, sida uu Eebbe waynaayee kitaabkiisa ugu sheegay: "**Wuuna u dhaafaa - eebbe - wixii aan gaalnimo ahayn ciddii uu doo**" [an-

.116 48

16

15

Nisaa:48, 116]. Haddii uu Eebbe doonana wuxuu kuadaabayaa naarta, caadilnimadiisa awgeed, kadibna wuu ka soo bixinayaa, raxmaddiisa awgeed iyo shafaacada ay u shafeecayaan kuwa shafaacada qaada ee Eebbe-adeeca ka mid ah, kadibna jannadiisa ayuu gelinayaa, taasina waa in uu Eebbe isxejiyay dadka asiga qiray, lamana mid dhigin adduun iyo aakharo dadka asiga beenshay, kuwaas oo ka habaabay hanuuntiisa, aanna ku guulaysan Eebbe xigsashadiisa. Eebbow, adigaa islaamka iyo ahalkiisaba wali u ahe, islaamka inagu sug inta aan kugula kulmayno.

Waxaa kale ee nala toosan in lagu daba tukan karo qof kasta oo muslimiinta ka mid ah ha suubanaado ama ha xumaadee, koodii dhintana lagu tukan karo, mid ka mid ahna janno iyo naar toona dejin mayno, kaafirnimo iyo mushriknimo iyo munaafaqnimo midna ku xukmi mayno haddii aanay waxyaabahaas qaarkood ka soo ifin, qarsoodidoodana Eebbe, kor ahaayee, ayaanu u daynaynaa.



Mana nala qumana in seef loo qaato qof ummadda nabi Muxamad (Nabadgelyo iyo Naxariisi korkiisa ha ahaatee) ka mid ah, inta aan ahayn midka ay seeftu ku waajibtay, mana aragno in imaamyada (madaxwayna yaasha iyo boqorrada iwm) iyo guddoomiya yaasha yada laga soo horjeesto in kasta oo ay dulmaan, habaarina mayno, ballantoodana ka bixi mayno, waxayna inala tahay in addeeciddodu ay ka mid tahay addeecidda Eebbe ee waajibka ah kor ahaayee, kol haddii aanay maesi dadka farayn.

Waxaanna ugu Eebbe tuugaynaa wanaag iyo toosnaan. Sunnada iyo jamaacadana waannu raacaynaa. Docubixidda iyo khilaafka iyo kala taggana waannu ka fogaanaynaa. Wuxaanna jecelnahay reera garsoor iyo amaano, waxaanna necebnahay reera dulmi iyo khayaano, waxaanna leenahay: ilaa baa inaga og, wixii aqoontooda humaag inaga galo.

Waxaan rumaysannahay in kabaha la masaxi karo safar iyo nagaadiba, sida xadiiska lagu sheegay, xajka iyo jihaadkuna waxay ku soconayaan amarka madaxda muslimiinta baarrigooda iyo dulmilowgooda intaba ilaa maalinta qiyaamaha wax burrinaya oo joojinaayana (xajka iyo jihaadka) ma jiraan.



Malaa'ikta wax qortana waan rumaysannahay, maxaa wacay Eebbe ayaa wuxuu ka dhigay kuwa ina raaca. Wawaanna rumaysannahay malagga mowdka ee loo xil saaray in uu nafta dadka ka qaado, iyo cadaabta qabriga qofkii mutaysta, iyo su'aasha (labada malag ee la kala yiraahdo) munkar iyo nakiir, ee qabriga ku waydiinaya qofka allahiisa iyo diintiisa, sida wararka nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee caddeeyeen, asaxaabtuna allaha ka raalli noqdee, laga weriyay. Qabriguna waa haro harooyinka jannada ka mid ah ama waa god godadka naarta ka mid ah.

Wawaanna rumaysannahay in laysa soo bixin doono (kolka la dhinto kadib), wixii lafalahyna abaalmarintoodu qiyaamaha ahaan doonto, iyo soo bandhigiddooda iyo xisaabta, iyo kitaabka aqriskiisa, iyo ciqaabta iyo abaalmarinta, iyo jidka (siraatka) iyo miisaanka.

Jannada iyo naartuna way abuuran yihiin mana dhammaanayaan waligood mana baaba'ayaan, maxaa yeelay Eebbe kor ahaayee jannada iyo naarta wuxuu abuuray intii uusan uunka abuurin, mid walbana dad buu u abuuray, qofkuu doono jannaduu fadligiisa ku gelshaa, kii uu doonana naarta ayuu cadligiisa ku geeyaa, qofwalibana waxay ku howl gelaysaa wax horey loo qoray, halkii loo abuuray buu tegi doonaa.

Khayrka iyo shartana addoomaha waa loo qoray, awoodda uu qofku wax ku falayana waa towfiiq uusan asigu lahayn oo falka la socota, hase ahaatee awoodda lafteeda, kolka laga eego xagga caafimaadka iyo kartida iyo xoogga iyo dhammaystirka lixaadka waxay ahaanaysaa falka ka hor, waana taas mappa Eebbe kor ahaayee ku yiri:**"Eebbe kuma kallifo naf wax aanay awoodin"**[*al-baqarah:286*].

Addoomaha falkooduna waa uun Eebbe, addoomuhuna way kasbadaan, Eebba kuma kallifin wax aanay awoodin, iyana ma awoodaan intii lagu kallifay wax aan ahayn, waana tafsiirka "Xeelad iyo xoog aan Eebbe ku ahaanin ma jiraan", waxaanna leenahay xeelad qof lihi majiro, dhaqaaq qof lehina ma jiro, leexasho macsida Eebbe laga leexdana cidna uma sugnaanin haddii aaney kaalma Eebbe ku ahaan, cidina awood uma laha in ay gudato daacada Ilaahay kuna nagaato haddii aan Eebbe ku toosin.

Wax walibana waxay ku socdaan doonista Eebbe iyo cilmiisa iyo go'aankiisa iyo qiyaastiisa. Doonistiisa ayaa ka sarraya doonisyada oo dhan, go'aankiisuna wuu ka adkaaday xeeladaha oo dhan. Wixii uu doono buu sameeyaa, asiga oo aan dulmilow ahayn waligiis, wuuna ka nasahanyahay xumaan iyo ceeb oo dhan "**lama waydiyo (Eebbe) waxa uu falayo, iyana (dadka) waa la waydiin (falkooda)**" [*al-Anbiya'*: 23].

Ducada iyo deeqda ay kuwa nooli bixiyaanna maytada way anfici, ducooyinkana Eebbe kor ahaayee asigaa aqbala, danahana asiga ayaa guda, wax walbana asiga ayaa hantay, asigana cidi ma hanato, Eebba ilbiriqsi cidi kama deeqtoona, ciddii ilbiriqsi Alle ka deeqtoonaatana way gaalowday, reera dambi bayna noqotay, Eebba wuu caroodaa wuuna raalli noqdaa, sida dadka oo kalena ma aha.



Asaxaabta nabigana, nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, waannu jecelnahay, cid ka mid ahna jacaylkeeda ka gaabin mayno, cid ka mid ahna ka beri noqon mayno, waanna nacaynaa ciddii naacda oo wax aan wanaag ahayn ku sheegta, wax aan wanaag

ahaynna ku sheegi mayno, jacaylka asaxaabtuna waa diin iyo iiماan iyo ixsaan, nacaybkooduna waa kufri iyo munaafaqnimo iyo qooq.



Khaliifada (muslimiinta) nabiga ka dib, nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, waxaan u qiraynaa Abuubakar as-Siddiq Allaah ka raalli noqdee, ayada oo looga fadli yeelayo loogana hormarinayo Imaamyada intooda kale, kadibna Cumar bin al-Khataab, Allaah ka raalli noqdee, kadibna Cusmaan bin Cafaan, Allaah ka raalli noqdee, kadibna Cali bin Abii Taalib, Allaah ka raalli noqdee, iyagaana khulafadii waxgaradka ahayd iyo imamaamyadii hanuunsanaa ah.



Tobanka uu nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, magacaabay oo uu jannada ugu bishaareeyay, waxaan u qiraynaa jannada, sidii uu nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee ugu qiray, warkiisa ayaana xaq ah, tobankaasina waa: Abuubakar, Cumar, Cusmaan, Cali, Talxa, Subayr, Sacad, Saciid, Cabdiraxmaan bin Cowf iyo Abuu Cubayda bin Jarraax, kaas oo ahaa ummaddan ammiinkeedi, dhammaantood allaha ka raalli noqdo.



Qofkii wanaag ku sheega asaxaabta nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, iyo afooyinkiisa xumaan oo dhan calas ka ahaa, iyo carruurtiisa xumaan oo dhan ka hufnaa, beri buu munaafaqnimo ka noqday hubaal.

Culumadii salafka ee horreeyay iyo kuwii taabiciinta ahaa ee ka dambeeyay ee ahaa reera khayr iyo ahlu xaddiis, iyo ahlu fiqhi iyo ahlu fikriga, wax aan wanaag ahayn laguma sheego, qofkii xumaan ku sheegana waddadii (toosnayd) kuma taagna.

Qof owliyada (ilaahay) ka mid ahna nabiyaasha midna ka kormarin mayno, nabadgelyo korkooda ha ahaatee, waxaanna leenahay: nabi kali ah ayaa awliyada oo dhan ka fadli badan. Waxaanna rumaysanahay awliyadaas wixii ay la yimaadeen ee karaamooyin ahaa, kuwaas oo si sax ah kuwo lagu kalsoon yahay wararkooda u soo tebiyeen.

Waxaanna rumaysannahay calaamadaha qayaamaha, oo ay ka mid yihiin: dajaalka oo soo baxa, iyo Ciise (Nabi Ciise) ina Maryam korkiisa nabadgelyo ha ahaatee, oo

samada ka soo dega, waxaanna rumaysannahay in qorraxdu ka soo bixi doonto halka ay u dhacdo, iyo in uu ka soo bixi doono bahalka-dhulku (daabadda dhulka) meeshiisii.

Faallow iyo fallowna rumaysan mayno, qof sheeganaya wax kitaabka iyo sunnada iyo go'aanka (*ijmaac*) ummadda (islaamka) gafsanna rumaysan mayno, waxaanna aragnaa in wadajirka(ummadda islaamku) xaq iyo toosnaan yahay, kala tagguna lumid iyo cadaab yahay.

20

19

Diinta ilaahayna dhulka ha ahaato ama samada ha ahaatee waa mid kali ah, waana diinta islaamka, Eebbana wuxuu yiri:**"Diintu Eebbe agtiisa waa islaamka"** [*al-Cimraan 19*]. Waxaa kale ee uu yiri kor ahaayee:**"Waxaan idiinku raalli noqday diin ahaan, islaamka"** [*al-Maa'idah:3*].

Waana diin u dhexeeyaa xadgudubka iyo gaabinta, wuxuuna u dhexeeyaa ekeysiinta (eebbe in loo ekaysiyo uunkiisa) iyo astaan-inkirka (in eebbe sifooyinkiisa la inkiro), iyo dirqi-aaminka(in la aamino in dadku waxa ay falayaan Eebbe ku dirqiyay oo aanay ikhtiyaar lahayn haba yaraatee) iyo ikhtiyaar-aaminka (in la aamino in dadku waxa ay falayaan awooddooda u gaarka ah ku falayaan), iyo aaminqabidda (in Eebbe cadaabiisa aan laga baqin) iyo quusashada (in naxariista Eebbe laga quusto).

.19

19

3

20

23

Marka kaas (diinkaas dhexdexaadka ah) baa diinkeenna ah, oo caqiidadeenna ah ha qarsoonaato ama ha qeexnaatee, annaguna Eebbe ayaan uga beri nahay, qofkasta oo gafsan waxyaabahaas aan soo sheegnay ee caddaynay.

Waxaanna Eebbe waydiisanaynaa kor ahaayee, in uu iimaanka inagu sugo, oo uu (nolosheenna) inoogu qatimo (iimaan), oo naga nabad gelsho caqiidooyinka is gafsan, iyo afkaarta kala firirsan, iyo madaahibta xun sida: mushabihada (ekaysiinta), muctasilada (kuwii raacay mad-habtii waasil bin cataa'), jahamiyada (qoladii Jaham bin safwaan mad-habtiisii raacday), jabariyada (kuwa dirqi-aaminka ah), qadariyada (kuwa ikhtiyaar-aaminka ah), iyo kuwo kale, ee ka mid ah kuwii khilaafay sunnada iyo wadajirka ummadda, ee raacay habawga, annaguna kuwaas beri baan ka nahay, waxayna agteenna ka yihiin kuwo lumay oo habaabay, dhowridda iyo toosintuna Eebbe bay ku ahaadeen.